

## Aqoon: Kunnskap



*Adobe Stock / faber14*

Sangen bevisstgjør hvor viktig det er å vare en elev, hvor viktig det er for å skaffe seg kunnskap og hvor galt kan det gå når man bruker klansystemet til å nå sitt mål.

Axmed Aw Geeddi Maxamuud "Dheeraad", ma aha hal-abuur kaliya ee waa dhaqan yaqaan isku hawla barashada dhaqanka' afka iyo suugaantå Soomaalida. badhtamihii sanadkii 1966.

Waxbarashadiisii dugsigahoose, dhexe iyo sareba waxa uu ku qaatey magaalada Hargeysa. Abwaanka hibadiisa hal-abuurnimo waxay bilaabmatey ardaynimadiisii. Wuxaan suugaantiisa laga xiiseyn jirey goobaha waxbarashada iyo golayaasha lagu kulmo. Maansadani waa heestii labaad ee uu curiyo abwaanku ee soo raacda taxanihii suugaanneed, ee abwaanka. Wuxa ay ka hadlaysaa aqoontu kaalinta ay bulshada kaga jirto. Wuxa uu xusayaa abwaanku in aqoontu tahay ta la isku dhaafo, dhanka kale waxa uu tilmaan cad ka bixinayaar ardaynimadu qiimaha ay leedahay, iyo waajibka saaran ardayga ee looga baahan yahay. Heestani waxa ay ummadda uga digaysaa dhammaan dhibaatooyinka ay leedahay qabyaaladdu, waxaanay sigaara ula hadlaysaa ardayda, iyada oo uga digeysa wax badan isaga oo tilmaan iyo tusaale ka bixinaaya in saddexda cudur ee ummadduhu ka qayliyeen ee kala ah Gaajada, jahliga, iyo cudurku, ay qabyaaladdu ka digo kulushahay.

## Aqoon: Kunnskap

*Arday waxaannu nahay*

*Aqoontiyo cilmiga*

*Lagu ababiyoo*

*Asluub iyo dul-qaad*

*Eebbe siiyayoo*

*Ummaddooda dhammi*

*U asxaan faloo*

*Ku adkeystayoo*

*Lagu wada ogyee*

*Ubaxii dalkoow*

*Ubadkii dadkoow*

*Indhihi dantoow*

*Ma abaal gudnaa?*

*Awr-ba awr-ka hore*

*Inta uu socduu*

*Kan danbana ogyoo*

*Ku itaalayaa*

*Nimanyahow aflaxay*

*Aarankaa kiciyo*

*Jiilka imanayaba*

*Ma tusnaa awood?*

*Dhabbo aayo wacan*

*Ubaxii dalkoow*

*Ubadkii dadkoow*

*Indhihi dantoow*

*Ma abaal gudnaa?*

*Dhibta aadamiga*

*Aafeysay iyo*

*limaha saddexan*

*Ee adduunka dhibey*

*Eell baa ka daran*

*Haddeynaan ogaan*

*Waa aqoon xumee*

*Aaniyo qabiil*

*Ma ka aarsanaa?*

*Ubaxii dalkoow*

*Ubadkii dadkoow*

*Indhihi dantoow*

*Ma abaal gudnaa?*

### ***Laylis***

I. Kajawaab weydiinaha soo socda:

1. Abwaanku sanadkee dhashay halkeese ku dhashay?

2. Heestu maxay ka hadlaysaa?

3 Abwaanku muxuu ula jeedaa marka uu leeyahay:

Awr-ba awr-ka hore

Inta uu socduu

Kan danbana ogyoo

Ku itaalayaa.

4. Abwaanku muxuu umadda uga digaysaa?

5. Abwaanku hal abuurnimada muxuu ku darsaday?

## BERRI SOOMAAL

Waxay heestani xambaarsan tahay dhacdooyin taabanaaya

nolosheenna. Wakhtiyadii hore sida noloshu ahayd waxa hubaal ah in

wax badani hadda iska badalleen, taasi ayay ka dhalatey heestani'

Waxyaabaha qiiamaha leh ee waagii hore aynu lahaan jirney ma yihii

hadda sidaasi? Waa Weydiinta abwaanku ina hor keeney' waxase aad

warcelintaasi ku arki doontaa maansadan oo tilmaameysa aragtidakala

duwanaansho ee waayahaasi

Dhibaatooyinka qaxootiga Soomaalida ku qabsadey qurbaha lama soo

koobi karo. Sidaa darteed marka la doonaayo in suugaan lagaga hadlo

waayahaqurbaha, dhinacyo badan baa laga eegi, karaa' Tixdani Berri

soomaal waa riwaayad ka sheekeyneysa qiso dhici karta ama dhacdeyba

Nin geeljire ah ayaa isagoo geelisii la jooga waxa uu hammiga galinayaan

in uu dhoofo, ka dib waxa uu galayaahawshaasi Wakhti ka dib ayaa uu

helayaa dal ku galkii uu ku tagi lahaa waddamada reer Galbeedka. Ninkii

odayga ahaa mararkii uu Yurub ka degey isaga oo aan hore u arkin

magaalooyin sidan u waaweyn amaba ay hadda ugu horreysyo magaalo

aragtideed. Nin hilib cun ah oo oon xoolaad ku korey ayuu ayuu ahaaye maqaaxi buu tagay,haddii uu wax la cuno weydiistey' "Isteeg" baa lahayaa ayaa loo sheegay.

Markii 1oo keeney ee uu cabbaar cunaayey ayaa waxa soo gashey koox somaali ah maqaaxidii oo

oo aan iyagu qurbaba ku cusbayn Sheeko dheer markii ay ninkii odeyga ahaa isla jaan qaadeen kooxdii ayaa

ayaa markiiba dag-dag loogu sheegey in waxan uu cunaya xoolo aheyn ee hilib doofaar yahay

balu ku dagtay inta uu yidhi ayuu matagla sara kacay, ilaa uu ka miyir beeley oo'dhakhtar loo la cararey. Ka dib

markii uu lånaadey, caano geel buu yaboohiyey' waase loo waayey. Talo wxåy kaga ururtey " ha ley mastaafuriyo oo dalkeygii ha la igu celiyo. Lama yeelin oo isagii baaba laga shakiyey oo la yidhi ninka maxaa eryanaaya?

Armaa ba uu danbiile yahay ee hala baadho.

Berri soomaal

Sidaan subaxiyo

Salaad uga gudey

Een u suudaleyse

Siddeed guuraba

I1'ma saarine

Sokeeyahayoow

War i siiyoo

Raggu sahankii

Ma sidii baa?

Geelu sidigtiilo

Ma sidii baa?

Adhi sarartii

Ma sidii baa?

Lo'du subaggii

Ma sidii baa?

Suuqii Yurub baan

Ku salcaamoo

Sida siigiyo

Siinga siingaha

Sumad laawiyo

Sirqaan qoranee

Sokeeyahayoow

War i siiyoo

Sokeeyiyo xidid

Ma sidii baa?

Isa sudhan gacal

Ma sidii baa?

Siiro wada taal

Ma sidii baa?

Salaan gobanimo

Ma sidii baa?

Sareedo adduun

Haddaan sarar lyo

Sixin dhami jirey

Sinji dhaannaa

I sadheeYoo

Duuf i siiyaye

Sokeeyahayoow

War i siiyoo

Soddoh alabkeed

Ma sidii baa?

Aoal sogortii

Må sidii baa?

Sitiyo1 aleel

Masidii baa?

Odkac iagu sugey

Ma sidii baa?